



## Caymis Caafimaad oo loogu talagalay Qof Walba

Qof kasta oo Washington deggan wuxuu heli karaa caymis caafimaad iyo mid ilkeed, iyadoon loo eegayn heerka socdaalkooda.

### Tallaabooyinka Si aad u codsatid

- **Soo ururi macluumaadkaaga**  
[Liisto-hubineedda Codsiga](#). Uma baahnid Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga (Social Security) si aad u codsato.
- **Caawimaad hel**  
Raadi [hagaha](#) ama la xiriir Xarunta Taageerada Macmiilka: [1-855-923-4633](tel:1-855-923-4633)  
TTY/TDD: [1-855-627-9604](tel:1-855-627-9604)
- **Buuxi codsiga**  
Waxaad caymiska ka dalban kartaa onlayn ahaan ama adigoo shakhsi ahaan ula taga hagaha.

Washington Healthplanfinder wuxuu hubiyaa u-qalmitaankaaga barnaamijyada federaalka iyo kuwa gobolka, WA Health Path iyo lacag dhimista. Kadib marka aad hesho natiijooyinkaaga, raac tilmaamaha shaashadda ka muuqda si aad u doorato qorshe oo aad isu diiwaangeliso.

### Immisa ayuu ku kacayaa caymisku?

Qiimaha caymisku wuxuu ku xiran yahay arrimo badan, oo ay ku jiraan dakhliga, tirada qoyska iyo meesha aad deggan tahay. Dadka qaarkii waxay u qalmaan barnaamijyo yareeya kharashyada billaha ah. Hagaha ayaa kaa caawin kara inaad fahamto haddii ay jiraan barnaamijyo kuu diyaarsan iyo inta ay tahay inaad bixiso bil kasta. Cascade Care orshayaasha waxay ku dhawaad had iyo jeer bixiyaan caymiska ugu fiican ee lacagtaada.

### Macluumaadkaygu ma yahay mid sir ah?

Badqabkaaga waa inoo muhiim. Macluumaadkaaga waxaa loo isticmaalaa oo keliya in lagu helo qorshayaasha caymiska iyo lacag dhimista kuu diyaar ah. Washington Healthplanfinder ma la wadaago macluumaadka dadka aan haysan heerka socdaal ee federaalku aqoonsan yahay.

Haddii aad iska diiwaangeliso Apple Health (Medicaid), macluumaadkaaga waxaa maamula Hay'adda Daryeelka Caafimaadka (Health Care Authority (HCA)). Wax badan ka akhriso hab-dhaqannada siraha ee HCA.

## Cusbooneysiintii ugu dambeysay

Waan la soconaa isbeddellada federaalka, Washington Healthplanfinder ayaana ku ogeysiin doona wax kasta oo saameynaya caymiskaaga ama lacag dhimistaada.

Qof kasta oo Washington deggan wuxuu caymis caafimaad iyo mid ilkeed ka heli karaa isagoo isticmaalaya Washington Healthplanfinder, oo ay ku jiraan dadka qaata Deferred Action for Childhood Arrivals (DACA) iyo dadka aan haysan "federally recognized immigration status" (xaalad socdaal oo federaalku aqoonsan yahay).

Isbeddellada federaalka awgood, dadka qaata DACA waa inay ku jawaabaan "No" (Maya) marka la weydiiyo codsigooda haddii ay yihiin "lawfully present" (kuwo sharci ku jooga).

## Macluumaadka Qorshaha iyo Barnaamijka

Waxaa jira qorshayaal iyo barnaamijyo kala duwan oo kaa caawinaya inaad hesho caymis. Bilow codsi si aad wax uga ogaato fursadaha diyaar ah.

**Waxaa jira linkiyo wata macluumaad oo laga yaabo inaan lagu heli karin luqaddaada. La xiriir hagaha ama Xarunta Taageerada Macmiilka si aad u hesho caawimaad luqaddaada ah.**

[1-855-923-4633](tel:1-855-923-4633)

TTY/TDD: [1-855-627-9604](tel:1-855-627-9604)

Caawimaad waxaa lagu helayaa in ka badan 200 oo luqadood.

## Cascade Care

Cascade Care waxaa lagu heli karaa oo keliya iyada oo la sii marayo Washington Healthplanfinder. Qorshayaashani waa kuwo la awoodi karo oo loogu talagalay dadka u qalma.

- [Cascade Care](#)
- [Cascade Care Savings](#)

## Gunnada Canshuurta

Gunnada canshuurta waxay yaraysaa lacagta aad ku bixiso qorshahaaga caafimaadka bil kasta. Waxaa bixiya dowladda waxaana lagu dabakhaa lacagaha joogtada ah ee qorshahaaga caafimaadka. Gunnada canshuurta waxaa lagu heli karaa oo keliya Washington Healthplanfinder waxaana heli kara dadka u qalma.

- [Gunnada Canshuurta](#)

## Apple Health

Apple Health wuxuu bixiyaa helitaan bilaash ah ama qiimo jaban oo lagu helo booqashooyinka dhakhtarka ee joogtada ah ee dadka uurka leh, carruurta iyo dadka waaweyn, iyo adeegyada qolka gurmada degdegga ah. Apple Health sidoo kale waa magaca Medicaid ee Washington. Kuwaani waa qaar ka mid ah barnaamijyada laga yaabo inay diyaar u yihiin adiga iyo qoyskaaga, magacyada qaarkood waxaa lagu bixiyay Ingiriis iyo luqaddaada si aad u tixraacdo:

- [Apple Health \(PDF\)](#)
- [Apple Health for Kids](#)
- [Apple Health for Pregnant Individuals](#)
- [Caymiska Dhalmada Kadib / After-Pregnancy Coverage \(PDF\)](#)
- [Balaarinta Apple Health / Apple Health Expansion \(PDF\)](#)

## Barnaamijyo Kale

Waxaa jira barnaamijyo kale oo kaa caawin kara adiga iyo qoyskaaga iyadoon loo eegayn heerkaaga ama xaaladdaada.

- [Qorsheynta Qoyska Keliya / Family Planning Only \(PDF\)](#)
- [Adeegyada Daryeelka Caafimaadka / Medical Care Services](#)
- [Caafimaadka Degdega ah ee Soo Galootiga / Alien Emergency Medical](#)

## Ilaha Macluumaadka

- [Wax badan ka baro dukumeentiyada la aqbalo iyo sida loo gudbiyo.](#)
- [Wax badan ka baro tallaabooyinka loo maro codsiga caymiska caafimaadka iyo kan ilkaha. \(PDF\)](#)
- [Wax badan ka baro helitaanka taageerada luqadda iyo sida loo helo agabyada la turjumay.](#)